## Liiska Ereyadda “Word List”

**Unugyo Aan Caadi Ahayn “Abnormal cells”:** Unugyada jirka oo aan caadiga ahayn una ekayn ama aan u shaqayneeyn unugyo caafimaad lahayn.

**Unugyada Kansarka dagaalka badan “Aggressive cancer cells”:** Unugyada jirka sida dhaqsida u koraayo kuna faafaayo goobo ka baxsan goobtii yareed oo horay ugu bilaawday.

**Anti-HER-2 antibody therapy:** daawada loo isticmaalo in ay daawayso kansarka naaska leh barootiinada HER-2 oo aan caadiga ahayn.

**Aromatase inhibitor:** waa daawada yareeyneeyso heerarka dhacaanka istaroojinka jirka (ka dib xiliga haweeynka caadada ama dhiiga ka dhamaato, badanaa da’ ahaan)

**Axillary lymph nodes:** xirmaha limfaha gacanta hoosteeda ka soo daadsho naaska limfaha

**Biopsy:** qalitaan lagu soo saaraayo xubin qaar ah si loo baaro haddii ay xubinto leedahay kansarka ama haddii ay tahay kansar la’aan.

**c-erb-2:** waa magac kale oo loo yaqaano barootiinka ama hiddo-wadaha HER-2

**Ka nadiifi darafyada “Clean margins”:** micnaheeda wuxuu yahay xubnaha ku wareegsan burada khatarta wuu ka madax-banaan yahay unugyada kansarka

**U dhaw darafyada “Close margins”:** micnaheeda wuxuu yahay unugyada kansarka wuxuu u soo dhawaaday geesaha dhinacyada xubinta ku wareegsan burada khatarta ah.

**Colloid:** waa nooc ka mid ah kansarka weeraro, kuna koraayo wareega xubnaha caadiga ah; wuxuuna u korayaa si tartiib ah.

**Comedo:** waa nooc ka mid ah kansarka wax aanan weerarin inta badana aanan faafin, una koraayo si dhaqsi ah.

**Cribiform:** waa nooc ka mid ah kansarka wax aanan weerarin isla markaana aanan faafin inta badana una koraayo si tartiib ah.

**Ductal Carcinoma in situ (DCIS):** waa kansarka wax aanan weerarin oo joogaayo gudaha dhuumaha caanaha (tubooyinka) iyo inta badana ma faafaayo.

**erb-2:** waa magac kale oo loo yaqaano hiddo-wadaha HER-2

**ER-saliimka ah “ER-negative”:** waa burada aan laheey qabtayaasha istaroojinka.

**ER-hubaal ah “ER-positive”:** waa burada leh qabtayaasha istaroojinka.

**Baarista FISH (Fluorescence In Situ Hybridization):** waa nooc ka mid ah baarista HER-2 hiddo-wade

**Hiddo-wade “Gene”:** waa qayb ka mid ah calaameeynta jirka sameeyso hiddo-wade unugyada cusub, waxayna xukuntaa koriinka iyo dib u dhiska unugyada.

**Qanjirada “Glands”:** eraygaan wuxuu leeyahay micnooyin kala duwan. Waxaana layskugu keeni karaa kooxyo unugyo ama xubno sameeynaayo ashyaa ah hal ama in ka badan oo jirka isticmaalaayo, sida qanjirada dhididka, caanaha, dhacaanada dareeraka, dhacaanka hormoonka iyo kuwa keeno koritaanka. Sifeeynta qanjirada kale ama ka saaro ashyaada wareega dhiiga ama dheecaanka limfaha. Qaar ka mid ah dadka “qanjirka” waxay ku fasiraan xirmooyinka limfaha.

**Heerka “Grade”:** waxay kuu sheegay qaabka sida unugyada burada ugu duwan tahay unugyada caadiga ah

**HER-2:** hidda-wadaha caawinaayo xukumida koritaanka iyo dib u dhisada unugyada.

**Qabtayaasha Hoormoonka “Hormone receptors”:** goobo aad u yar sida unugyada dhagta wax lagu maqlo, looguna jawaabo calaamadaha fartiinta baaqa ee hormoonada

**Baarista “IHC (immunohistochemistry) test”:** waa nooc ka mid ah baarista barootiinka, sida ER iyo HER 2.

**In situ:** waa kansarka joogaayo gudaha qayb ka mid ah naaska halkii oo ka bilaawday; kuna faafin qaybo kale, laakiin muddo ka dib, kansarka  situ wuxuu horumarinayaa in oo noqdo kansarada wax weeraro.

**Invasive:** waa kansarka ku faafo goobo fara badan halkii oo ka bilaawdayna ka badan

**Invasive Ductal Carcinoma (IDC):** waa kansarka ka bilaawdo xididada caanaha laakiin ku koraayo wareega xubnaha naaska caadiga ah

**Invasive Lobular Carcinoma (ILC):** waa kansarka ka bilwaado gudaha qanjirka caanaha sameeyo, laakiin ku koraayo wareega xubnaha naaska caadiga ah

**Unugyada aanan caadiga aheeyn “Irregular cells”:** waa unugyo aanan u ekeeyn unugyada caafimaadka qabo ee jirka

**Ki-67:** waa baarista kuu sheegayso sida dhaqsiyaha oo u koraayo kansarka

**Lobular Carcinoma in situ (LCIS):** Unugyada aanan caadiga aheeyn laakiin joogaayo gudaha qaybaha naaska caanaha sameeyo

**Lymphatic invasion:** micnaheeda waa unugyada kansarka laga helo xididada yar-yar limfaha

**Lymph nodes:** waa kanaalada sifeeyo dhacaanada dhareerka limfaha; waxayna isku dayayaan in ay qabtaan ama siriq u dhigaan unugyada kansarka ka hor inta aysan gaarin qaybaha kale jirka

**Darafyada “Margins”:** waa qaybaha xubnaha caadiga ah oo ku wareegsan burada halka laga saaray

**Medullary:** waa nooc kansarka wax weeraro kuna koraayo xubnaha ku wareegsan caadiga ah

**Milk ducts:** waa caarada tubada yar naaska caanaha ka soo baxaan

**Milk lobules:** waa qanjirka naaska caanaha sameeyo

**Mucinous:** waa nooc kansarka wax weeraro kuna faafa wareega xubnaha caadiga ah

**Darafyada saliimka ah “Negative margins”:** micnaheeda waa xubnaha ku wareegsan burada kana madax-banaan unugyada kansarka

**Non-invasive:** waa kansarka joogaayo gudaha qaybta naaska halkii horay uga bilaawday

**Papillary:** waa nooca kansarka aan waxba weerarin oona faafin si tartiib ahna u koraayo

**Pathologist:** waa dhakhtarka ku fiiriyo weyneeyaha si oo u arko haddii xubnaha in ay caadi yihiin ama in ay jiran yihiin

**Darafyada Hubaal ah "Positive margins":** micnaheeda waxay tahay unugyada kansarka waxay gaaray geesaha xubnaha caadiga ah oo ku wareegsan burada.

**Kansarka-hore "Pre-cancerous":** waa burada aan loo tixgalineeynin kansarka; waana calaamada digniinta oo loo malaynaayo in oo kugu dhici doona kansarka mustaqbilka.

**PR-PR-Saliimka ah "PR-PR-negative":** waa burada aanan lahayn qabsayaasha baroojeestaroon

**PR-Saliimka "PR-positive":** waa burada leh qabsayaasha baroojeestaroon

**Soo Noq-noqdo "Recurrence":** goorta kansarka dib kugu soo laabto

**Adag "Solid":** waa nooc ka mid ah kansarka aanan weerar laheeyn; kansarka aanan faafin, si tartiib ahna u koraayo

**S-phase fraction test:** baarista kuu sheegayso dhaqsiyada kansarka ku koraayo

**Marxalad "Stage":** waa qaybta loo isticmaalo in lagu fasiro heerka dhibaatada kansarka naaska, iyadoo sal-dhig looga dhigaayo cabirka burada, ku fiditaanka burada ay ku balaaratay maqaarka, murqaha, iyo xubnaha kale oo u dhaw iyo xirmooyinka limfaha ku lug leeyahay.

**Tamoxifen:** daawada joojinayso istaroojinada in ay gaaro qabsayaasha hormoonka ee burada.

**Tuubo ah "Tubular":** waa nooca kansarka weerara kuna koraayo wareega xubnaha caadiga ah; inta badana si tartiib ah u koraayo.

**Vascular invasion:** micnaheed waa unugyada kansarka laga helo xididada yay-yar ee dhiiga.